



## Madison iyo Roosevelt way dareemeen raadka togan ee barnaamijka RESPECT ee Damian Lillard

Ardayda iyo shaqaalaha, oo jooga goobta jidh-dhiska dugsiga sare, ayaa qoylo isla oogsaday markii xiddigga Trail Blazers-ka Portland uu soo galay dhismaha – kaasi waxa laga yaabaa inuu yahay sawirka waaraya ee [barnaamijka RESPECT ee Lillard](#) Laakiin haddii aad si dhaw u eegto faahfaahinta, waxaad ogaan doontaa waxa barnaamijku uga dhigan yahay labada dugsi sare ee PPS kuwaasi oo shurako ku ah isaga.

Lillard wuxuu bilaabay barnaamijka 2012 si uu ugu dhiirigaliyo dhallinyarta inay "xaadiraan, dadaalaan oo naxariis yeeshaan." Xerada dugsiga sare ee Marshall High School, halkaasi oo uu Madison degganaa laba sano, raadka waxa calaamad u ah toddobaad kasta taayarada shanqadhaya ee gaari-ximaarka la riixayo jidadka dhismayaasha. Dugsiga sare ee Roosevelt High School, waxa ka dhaca baaqa PA.

Madison iyo Roosevelt, kuwaasi oo marka lagu daro dugsiga sare ee Parkrose High School ah dugsiyada shuraakada la ah RESPECT 2019-20, waxay ka helaan shayo Lillard bil kasta. Tigidhada ciyaarta iyo kabo saxeexan waa qaybaha bandhigga, Lillard sidoo kalena wuxuu diraa boorsooyinka dhabarka, koofiyado, istikarro iyo shayo kale.

Shayada ka imanaya xiddiga ciyaaraha ee ugu caansan magaalada waxay u noqdeen dhiirigalin abaalmarin habdhaqanka togan.

Roosevelt wuxuu isticmaalaa tigidhada ciyaaraha – wuxuu ka helaa 40 bil kasta Lillard – si uu sare ugu qaado ka soo qaybgalka. Bil kasta, dhammaan ardayda ka soo qaybgalkoodu yahay 90% ama ka sarreeya waxa la galiyaa qoritur kaasi oo 14 arday ay helaan laba tigidh hal ciyaar.

Dugsigu sidoo kale wuxuu codsadaa magacaabis la adeegsanayo bostikaadh rasmi ah marka la eego ardayda laga yaabo inayna buuxin 90%, laakiin qaaday tallaabooyin togan. Boostikaadhada magacaabista waxa lagu soo bandhigaa jidadka dhismayaasha ee xerada sidoo kalena guryaha ayaa loogu geeyaa waalidiinta. Ardayda la magacaabo waxay helaan kiish hadiyadeed oo wata boorso dhabar, koofiyad iyo istikarro.

"Waxay muujiyeen isbaddal wayn habdhaqankooda iyo xushmadda ay u hayaan waxbarashadooda ama bulshada, ama wax kasta oo ay noqon karto," ayuu dhahay Jonquil Vann, la-taliye xiriiriya barnaamijka RESPECT ee Roosevelt.

Kabaha Lillard saxeexay ee abaalmarinta sare ah waxa loo abaalmarayaa ka qayb ahaan barnaamij si loogu dabbaaldego qalinjabinta dhabbaha ku taagan.

Madison, RESPECT waxa lagu xiriiriyaa qiyamka CREED ee dugsiga -- marka la eego bulshada, xushmadda, waxbarashada, sinnaanta iyo kala-duwanaanta. Toddobaad kasta, maamule ku xigeenku, Travis Johnson wuxuu riixaa gaari-ximaar shanqadhaya xerada dhexdeeda si uu ugu qaybiyo kabaha, shaararka, tigidhada, koofiyadaha iyo boorsooyinka 10-ka arday ee ilaaliyey mabaadii'da CREED.

"Waa dhiirigalin caqiibo leh taasi oo aynaan awoodneen haddii aanu jiri lahayn barnaamijka RESPECT," ayuu dhahay Johnson.

Labada dugsiba waxay ku abaalmaryaan tigidhada macallimiinta, kuwaasi oo ay magacaabeen saaxiibadood wax fiican oo ay qabteen darteed.

Bil kasta, dugsi kasta sidoo kale wuxuu diraa sawir iyo sharaxaadda arday ama macallin wax wanaagsan qabtay shaqaalaha Lillard, qofkaasina wuxuu ka soo muuqdaa [Lillard's Twitter feed](#), taasi oo leh 1.8

Sidoo kale waxa jira kulamo yaryar. Bishii Sibtambar, Lillard wuxuu ku martiqaaday arday ka socota dhammaan saddexda dugsi sare ee shurakada la ah xaflad baraf-ku-socosho (skating) oo ka dhacaysay Oaks Park. Lillard, oo ah qof caan ku ah kabaha barafka lagu ciyaaro, wuxuu kiraystay xarun wuxuuna ku qaatay wakhti isagoo ardayda la sheekaysanaya.

"Carruurta waxay lahaayeen kubbad," ayuu dhahay Johnson.

Lillard wuxuu ka soo muuqday kulamada labada dugsiba, bishii horena, wuxuu ka yaabiyey 75 ah ku guulaystaasha CREED ee Madison isagoo kulanka kala soo qaybgalay.

Xiriirka Lillard wuxuu u furay fursado kale dugsiyada. Ardayda saxaafadda ka barata Madison ayaa kaqaybqaatay Press Pass-ka CJ, oo ah barnaamij uu hoggaamiyo ninka ay isku kooxda ahaan jireen Lillard, CJ McCollum, kaasi oo ku takhasusay saxaafadda Jaamacadda Lehigh.

Saddex arday oo hoggaaminta ka barta Roosevelt ayaa fursad u heli doona inay la shaqeeyaan shaqaalaha hawlgallada geeymka Blazers, iyagoo baranaya sida hawlgabadka wakhtiga fasaxa iyo bandhigga wakhtiga nasashada la isugu qaado, oo ah macluumaad ay awoodi doonaan inay isticmaalaan si ay dardar u galiyaan kulamada dugsiga ka dhaca

"Waxay noo furi doontaa albaabbo badan si aannu u sifaynno qaybaha kale ee dugsiga," ayuu dhahay Vann.

Marka lagu daro dhiigalinaha, xiriirka lala leeyahay xiddigga ugu caansan gobolka waa arrin wayn oo ay ku faanaan Madison iyo Roosevelt.

"Xaqiiqda ayaa ah inuu xusuusqor ka qaatay Roosevelt iyo qaar kamid ah waxyaalaha layaabka leh ee halkan ka dhacaya," ayuu dhahay Vann, isagoo ka jawaabaya aragtida ka jirta Madison. "Xaqiiqdii dhammaantayo mahad gaar ah ayaannu u haynaa."